

ndis

Taageerada beddelka ah ee aad u isticmaali karto maalgelinta NDIS

Somali | Soomaali



Akhris
Fudud



Haddii aad rabto in dukumiintigan lagaa caawiyo

Waxaad heli kartaa qof kaa caawiya:



- inaad fahamto dukumiintigan
- inaad hesho macluumaad dheeraad ah.



Macluumaadka ku saabsan halkaad la soo xiriireyso wuxuu ku qoran yahay dhamaadka dukumiintigan.


Ku saabsan dukumiintigan

Wakaaladda Caymiska Naafada Qaranka
(The National Disability Insurance Agency -
NDIA) ayaa qortay dukumiintigan.



Marka aan isticmaalno ereyga annaga, waxa
laga hadlaya waa NDIA.

Waxaan bixinaa Qorshaha Caymiska Naafada
Qaranka ama NDIS.




Dukumiintigani wuxuu ku saabsan yahay
taageerooyinka beddelka ah ee aad u
isticmaali karto maalgelinta NDIS.

Taageerada beddelka waa taageero:



- aan kuu sheegnay **in aadan** u isticmaali
karin lacagaha NDIS
- si aad u isticmaasho xaaladaha qaarkood.

Adiga **waxaa laga yaabaa** in lagu ogolaado inaad hesho taageero beddel ah haddii aan isku raacno.



In taageeradaas beddelka ahi:

- ay beddelayso taageero qeyb ka ah qorshahaaga
- kharashka ku baxayo uu la mid yahay ama ay ka yartahay taageerada qorshahaaga kujirta
- ay la mid tahay ama ka wanaagsan tahay taageerada qeybta ka ah qorshahaaga.



Taageerada laga yaabo in laguu ogolaado inaad u isticmaasho maalgelinta NDIS

Alaabta guriga ee caadiga ah ee la heli karo

Tani waxay ka dhigan tahay alaabaha guriga ee la hubo inay kaa caawinayaan:



- baahiyaha naafada
- inaad noqoto qof isku filan.

Dadka qaar ayaa laga yaabaa inay ku bixiyaan maalgelinta NDIS tignoolajiyada qofka caawinaysa.



Tignoolajiyada qofka caawinaysa waxaa loola jeedaa waxyaalaha caawiya dadka naafada ah.

Saacadaha casriga ah (smart watches)


Saacadaha casriga ah (smart watches)

waa kuwa:



- kugu xiri kara internetka
- aad ku xiran karto gacanta.

Waxaa **laga yaabaa** in lagu ogolaado inaad lacagaha NDIS ku soo iibsato saacad casri ah haddii:



- uu taleefankaas kaa caawinayo wada hadalka
- ay tahay qaabka ugu fiican ee aad wada hadal ku sameyn karto.

Tablets



Tablet waa wax:


- kugu xiri kara internetka
- meel kasta ayaad u qaadan kartaa.

Waxaa **laga yaabaa** in lagu ogolaado inaad lacagaha NDIS ku soo iibsato tablet haddii:



- uu taleefankaas kaa caawinayo wada hadalka
- ay tahay qaabka ugu fiican ee aad wada hadal ku sameyn karto.


Taleefannada casriga ah (smart phones)



Taleefannada casriga ah (smart phones)
waa shay:

- kugu xiri kara internetka
- meel kasta ayaad u qaadan kartaa.


Waxaa **laga yaabaa** in lagu ogolaado inaad
lacagaha NDIS kusoo iibsato taleefan casri
ah haddii:



- uu taleefankaas kaa caawinayo wada hadalka
- ay tahay qaabka ugu fiican ee aad wada hadal ku sameyn karto.


Apps loogu talagalay inay wax fududeeyaan iyo wadahadalka

Apps loogu talagalay inay wax kasta fududeeyaan iyo wada hadalka waa barnaamijyada:



- aad ku soo dejisan karto qalabka, sida tablet ka oo kale
- kaa caawinaya inaad wadahadal sameyso.

Waxaa **laga yaabaa** in lagu ogolaado inaad lacagaha NDIS kusoo iibsato Apps haddii ay:



- kaa caawinayaan wadahadalka
- ay yihiin habka ugu fiican ee aad qofka kula xiriiri karto.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumiintigan

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dukumiintigan, fadlan nala soo xiriir.




Waxaad na soo wici kartaa

1800 800 110



Waxaad noo soo diri kartaa iimayl

enquiries@ndis.gov.au



Waxaad si toos ah u booqan kartaa mid ka mid ah xafiisyadeena

Waxaad ka heli kartaa xafiiska deegaankaaga mareegaha NDIS.

[ndis.gov.au/contact/locations](https://www.ndis.gov.au/contact/locations)


Wax badan ka baro NDIA



Booqo mareegaheena

ndis.gov.au

Nagala soco kanaaladeena bulshada



[Facebook-ga](#), [Twitter](#), [Instagram](#),
[YouTube](#), [LinkedIn](#)

Hel caawimo si aad noola soo xiriirto

Dadka u baahan in laga caawiyo luuqada Ingiriiska



waxaad ka wici kartaa Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS).

131 450

Dadka dhegoolka ah ama maqalku ku adag yahay



Waxaad isticmaali kartaa Adeegga Gudbinta Qaranka.

relayservice.gov.au



Waxaad isticmaali kartaa qaabka telefoonka qoraalka (text telephone mode - TTY).

1800 555 677



Waxaad isticmaali kartaa gudbinta codka

1800 555 727

Dukumiintigan akhrintiisu ay sahlan tahay waxa sameeyay Scope (Aust) Ltd. bishii Nofeembar 2024 iyada oo la adeegsanayo Calaamadaha Isgaarsiinta Sawirka (Picture Communication Symbols - PCS). PCS waa astaanta Tobii Dynavox, LLC. Dhammaan xuquuqda daabacaadan gaar ayaa loo leeyahay Ogolaansho ama fasax haddii la helo waa la isticmaali karaa. Dukumiintigan waa inaan laga iibin cid saddexaad. Sawirada waa inaan dib loo isticmaalin iyadoon fasax la heysan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sawirada, kala xiriir Scope 1300 472 673 ama booqo scopeaust.org.au